# Golaha Wakiiladda

## <u>Waaxda Shuruucda, Fadhiyada iyo Hadal-qoraalka</u>

### Golihii 5aad ee Wakiillada, Kal-fadhigii 12aad, Fadhigii 22aad

**22 September 2025**

**Quraanka: -** Md. Sh. Axmed Dayib.

**Gudoonka: -** Siciid Mire Faarax (Giire)

**Ajandaha Fadhiga:-** Doodda Wax ka badelka Xeerka Ciidanka Biayka

**Gudoomiyaha:-** Mudanayaal, sidaynu u balansanayn waxaynu maanta bilaabaynaa doodda wax ka badelka iyo kaabista Xeerka Ciidanka Bilayska, marka waxaan xoghaynta farayaa in la diiwaangaliyo mudanayaasha doodda ka qayb-qaadanaya.

**Md. Faysal Yuusuf Jaamac** *{04min, 01sec}:-* Bismilahi, Raxmaani, Raxiim, waad mahadsantahay gudoomiye mudanayaashana waan salaamayaa.

Mudane Gudoomiye iyo Mudanayaal, xeerkan kaabista iyo wax kabadalka Booliska waa xeer muhiim ah, waxaan anigu fikrad ahaan **Qodobka 30aad** oo ka hadlaya waxyaabaha ka reeban xubnaha ciidanka Booliska, waxaan ku dari lahaa **faqrad 18aad** taas oo ah "***in aanu ciidanka boolisku yeelan wax balwad ah"*** taasi waa qodob wuxuu noqonayaa ciidan boolis ah oo nadiif ah oo aan balwad lahayn.

Waxa kale oo aan ku darilahaa Gudoomiye waxa aynu nidhi in la sameeyo gudida cabashada ka dhanka ah ciidanka booliska gudidaa waxa ka mida baynu nidhi qaabka loo soo magacaabayo ay noqoto **xubin shacab ah oo ay soo magacawdo Gudida Nabadgaleyada iyo difaaca ee Golaha Guurtida** halkaa waxaan odhal lahaa xubintaa shacabka ah aynu ka deynoo, aynu nidhaahno **xubin dhaqan yaqaan ah, oo diin iyo akhlaaq u saaxiib ah inay soo magacawdo gudida nabadgelyada ee guurtidu** oo halkaa shacabka aynu ka saarno xubin dhaqan yaqaan ah ku badalno.

Dhinaca kale xubin shacaba baynu nidhi oo ay soo magacaabayso Gudida Nabadgelyada ee Golaha Wakiiladu taana waxaan odhan lahaa **xubin aqoonyahan ah oo ay soo magacawdo gudida nabadgelyada ee Golaha Wakiiladu**.

Waxa kale oo aynu nidhi gudiddu waxa ay gobol walba ka sameysanaysaa gudi heer gobol ah oo ka kooban intii aynu xaga hore ku soo sheegnay uun ah, **waxaan soo jeedinayaa Mudnaayaal awooda dhaqaalaheena iyo hawsheeda waynu garanaysaa in la yareeyo**

**xubnahaa gudida ee gobolada** oo marka la yidhaa gobol walba todoba xubnood ha laga sameeyo oo kharashkoodii iyo hawlahoodii wata waynu fahmaynaa oo culays bay keenaysaa. Markaa waxaan odhan lahaa xubnahaa gobolada aynu ka dhigno saddex xubnood, hadaynaan iskaba dayn oo aynaan ka saarayn oo gudidan aynaan ka dhigayn gudi wareegta oo heer qaran ah.

Waxaan odhan lahaa gudiddaa la magacabayo ee gobolada mid waliba 7 xubnood noqonayso waxay noqonaysaa culays. Teeda kale gudiddan la magaacabay ee cadaalada ee dhagaysanaysa cabashooyinka dadka waa in loo qorsheeyaa ama miisaaniyada loogu daraa dhaqaale ay ku shaqeeyaan, xafiis waa inay yeeshaan waxa weeyaan kharash baa ka soo kordhaya halkaa haddii la yidhaahdo gobol walba 7 xubnood ha laga sameeyo aniga fikradayda waxay noqonaysaa culays markaa ***waxaan odhan lahaa ama aynu koobno oo 3 xubnood ku soo koobno ama aynu iskaba deynaba oo gudidan heerka qaran ah ha laga dhigo gudi wareegta oo meeshii cabasho ka timaado tagta.***

Waxaan ku soo koobayaa Mudane Gudoomiye waxaynu u baahanahay in ciidanka booliska la siiyo tababar wey ku jirtaa tababarkaa in awooda la saaro in ciidanku ay ahaadan ciidan tababaran. Shacabkana in loo sameeyo wacyigalin si ay u la shaqeeyaan booliska, booliskana in laga dhaadhaciyo oo la fahansiiyo in dadku dadkoodii yahiin oo aanay ahayn cadow; waxaad arkaysaa askari boolis ah oo marka gaadhi joojinayo garaacaya gaadhigii ama feedh la dhacaya markaa waxaan odhan lahaa booliska ha lagu wacyigaliyo in ay yahiin saaxiibka dadka, kuna shaqeeyaan sharciga iyo xeerarka dalka u yaala, qofka muwaadinka in aanay boolisku handadin ama aanay direyska ugu hanjabin. intaas baan odhan lahaa aad iyo aad baa u mahadsantahiin WSC.

**Md. Xirsi C/laahi Xirsi** *{04min, 46sec}:-* Bismilahi, Raxmaani Raxiim, wasalaatu calaa Rasuulilaah, SCW. Mahadsanid Gudoomiye, doodayda hadaan galo qodobka waxaan ka **bilaabay Qodobka 3aad** ee page-ka 3aad waxaanan ku soo daray hal faqrad. **Qodobkaas 3aad** wuxuu ka hadlayaa u jeedooyinka xeerka **markaa faqarad 6aad ayaan ku soo daray** oo odhanaysa ujeedooyinka xeerka waxa ka mid ah **"in Meesha laga saaro isticmaalka awooda xad dhaafka ah {police brutality} ee ay boolisku isticmaalan xiliyada mudaharaadada**" marka intaas Meesha laga saaro waa in lagu daro waajibaadka xeerka.

Waxa aan uga sii gudbayaa **Qodobka 8aad** ee page-ka 6aad oo ka hadlaya astaamaha ciidanka bilayska JSL waxa aan halkan ku soo daray **waa inuu Askari kastaa yeeshaa kaadh aqoonsi oo uu ku cad yahay magaciisa oo afaran iyo tirisiga shaqadiisa**;

Markaa askarigu waa inuu jeebkiisa ku sitaa **ID card-kiisa** wakhtiga uu shaqado ku jirana qofka muwaadinka ee ka codsada waa inuu tusaa si loo garto inuu yahay askari rasmi ah oo ciidanka booliska JSL ka tirsan.

Waxaan uga gudbayaa **Qodobka 15aad** oo ka hadlaya waajibaadka ciidanka booliiska, waxaan ku soo daray **faqrad 26aad** oo markaa waajibaadkooda ku biiraysa taasi oo ah "**baadhista, *dabagalka iyo ka hortaga dembiyada tiknoolajiyada casriga ah"***, madama oo dhawaan aynu ansixin doono xeerkii dembiyada tiknoolajiyada casriga ah, boolisku waa inay yeeshaan waax iyagu baadha kana hortagta dembiyada lagu galo tiknoolajiyada casriga ah oo imika aad inoogu soo batay iyadoo aad arkayso qofku social media ah wuxuu doono inuu ku qorayo qofkuu doono sharaftiisa ku tumanayo aanu u arkayo inuuna wax danbi ahi ka raacayn taa markaa boolisku waa inay yeeshaan waax gaar ah oo ka hortagta sidoo kale waaxdaasi waa inay ka hortagtaa dhacaha la isku dhaco tiknoolijiyada dhexdeeda.

Waxaan uga gudbayaa **Qodobka 30aad** qodobkan oo ka hadlaya waxyaabaha ka reeban ciidanka bilayska halkan waxan ku soo daray faqrad cusub oo noqonaysa **faqrada 18aad** taasi oo odhanaysa "**ciidanka booliska waxa ka reeban inay xidhaan qof muwaadin ah iyaga oo aan haysan waaran maxakamadeed"**.

Waxa aad iyo aad dalkeena ugu badan iduu qofi iska tago saldhig inuu yidhaa hebel ii soo xidha dabadeena laba askari dabadeedna hebelkii oo shaqadiisa iskaga jira la soo laaladiyo isaga oo askarigu aan sidan waaran maxamadeed taasina waa danbi uu askarigu galayo muwaadinka wuxuu xidhi karaa marka uu danbi faraha kula jiro laakiin hebel baa iska soo xidhanayaa laba askari isiiya waa arin ku badan saldhigyadeena waxaan qabaa mudane gudoomiye inaynu ku cadayno xeerka aanay dibna u dhicin.

Waxaan uga gudbayaa **Qodobka 34aad** oo ciwaankiisu uu yahay cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka booliska halkan gudidu waxay sameysay gudi heer qaran gudidasi oo ay tidhi xubin ka socota, Gudida nabadgelyada Golaha Guurtida, xubin ka socota Gudida nabad gelyada ee Golaha Wakiilada, xubin uu magacaabo wasiirka arimaha gudahu, xubin sarkaal booliis ah ama khabiir ah oo uu magacaabo taliyaha boolisku **halkaa waxaan ka dhigay laba xubnood maadama gudidani ay baadhayso boolis waa inay ku jiraan** dad khubaro ah oo yaqaana shuruucda booliska, markaa haday wixiiba shicib noqdaan shicibku ma baadhi karaan booliska, markaa xubnaha booliska ee ku jiraa aanay ka yaraan laba laakiin waa inay noqdaan xubno aad u khubaro ah ama xubno boolis oo hawl gab ah{retire} oo iyagu halkaa fahan badan u leh.

Waxaan ku soo gababeynayaa, **Qodobka 39aad** kaasi oo ka hadlaya hubka iyo rasaasta ay isticmaali karaan ciidanka booliisku, halkan waliba Mudane Gudoomiye hal qodob baa ku soo daray oo isna ilaalinaya uun shacabka; **wakhtiga mudaharadyadu ay dhacayaan ciidanka boolisku waa inaanay isticmaalin rasaas nool ee badalkeeda ay isticmaalan rasaasta aan noolayn, biyo tuurayaasha, qiiqa dadka kaga ilmaysiiya oo qudha**".

**Waa in aanay jirin mudaharad ay shicibku mudaharadeen oo ciidanka bilayskuna rasaas nool ay la dhacayaan dadka;** markaa halkaa waxaan odhan lahaa qodobkaa ha lagu soo daro. Aad iyo aad baa u mahadsantahiin.

**Md. Saleebaan Maxamed Faarax (Goox)** *{05mint, 16sec}:-* Mudane Gudoomye, Mudanayaasha Golaha, Shaqaalewaynaha inta halkan joogta marka hore ASC, marka hore waxaan u mahadnaqayaa Gudiddii ka soo shaqaysay xeerkan.

Mudane Gudoomiye waxaan ku bilaabayaa dhawr qodob oo qaadanaya dhawr qodob iyo farqado aan jecelahay inaan halkan ka soo jeediyo aragtidayda shaqsiga ah.

**Qodobka 8aad oo ka hadlaya astaamaha Ciidanka Booliiska** Somaliland, marka astaanta halkan lagu soo qoray sifooyinka qaar ba la siiyay inay la mid noqdaan astaamaha ciidanka dalkan burburay ee Soomaaliya inay isku mid yihiin, astaamaha ciidanka bilayska Somaliland iyo bilayska Soomaaliya waa iskumid, sidaa darteed, waxaan soo jeedin lahaa in Ciidanka Somaliland loo sameeyo astaan cusub oo aan tan Soomaaliya la mid ahayn, una gaar ah Ciidaaka Jamhuuriyada Somaliland ee Bilayska, waayo haday noqoto dhinaca Ictiraafka, haday noqoto qaranimada Somaliland, waayo hadii diraysku la mid noqdo dirayska wadamada kale waxay qaranimada iyo waxyaabaha aynu ku naaloonayno ayay taamanaysaa, markaa waxaan soo jeedinayaa astaantaasi waa inay gabigeedaba ka duwanaato Astaanka Bilayska Soomaaliya.

Isla **Qodobka 8aad** isla qodobkaas waxa ku qoran kaadhka askariga bilayska ah lagu qoran magaciisa oo afaran, waxaan soo jeedinayaa in laga dhigo magaca oo saddexan, waayo hadii marka jeebka dushiisa lagu dhijiyo magaca afaran wuxuu dhaafayaa astaantii oo wuu dheeraanayaa, sidaa darteed, waa in magaca lagu soo koobo saddexan aragtidayda.

**Qodobka 31aad Xarafkiisa D** oo sheegaya cida awooda anshax marinta waxa lagu dari doonaa xeer-nidaamiyaha xeerka, waxaan ku badeli lahaa oo aan soo jeedinayaa in Xubinta waxaas ku kacda shaqada laga eryo gabigaba oo aan loo raacin xeer-nidaamiye iyo wax kalena cudur daar looga dhigin ee shaqada laga eryo.

**Qodobka 35aad Farqadiisa 3aad** waxaan soo jeedinayaa in halka ay ku taalo taliyaha ciidanka lagu badelo Gudidda heer qaran oo taliyaha Meesha laga saaro.

Isla **Qodobka 35aad Farqadiisa 4aad** waxay sheegaysaa cabashooyinka halka loo gudbinayo, askariga cabanaya, ka dibna taliyaha ciidanka Booliiska, ka bacdina Wasiirka Arrimaha Gudaha, saddexduba waa cidii laga cabanayay, marka cidii laga cabanayay in hadii dib loogu celiyo cabashadii wax micno ah ma soo kordhinayso, markaa waxaan soo jeedinayaa **in laga dhigo Gudidda heer qaranka oo lagu badelo.**

**Qodobka 36aad** waxaan aaminsanahay in gabi ahaanba Meesha laga saaro oo aanu Meesha ku haboonayn.

**Qodobka 39aad** oo ah in ruqsada xaga hubka marka laga eego in baastoolad aan lagu soo koobin, oo laga dhigo Baastoolad ilaa qori sida qoriga AK oo kale, xaga amniga qofku sida Xildhibaanka oo kale waxa laga yaaba amniga inay ka fiican tahay, xaga dakhligana waxa laga yaabaa inuu dakhli soo kordhiyo, marka qodobkaasna yaan baastoolad lagu xadidine qori ha lagu soo kordhiyo ayaan soo jeedinayaa.

Waxaan runtii ku waafaqsanahay Mudane Xirsi iyo Mudane Faysal qodobada ay soo jeediyeen. Intaas ayaan ku soo koobayaa fikirkayga, WSC.

**Md. Maxamed Xasan siciid** {5min, 30 ec}: **-** Bismilaahi Raxmaani Raxiim mudane Gudoomiye iyo mudanayaal Asalaamu calaykuw, waraxmatulaahi wabarakaato, mudane gudoomiye Xeerkan waxaan u arkaa in uu yahay xeer ahmiyad gaar ah leh, waxaan ka war qabnaa in uu Bilaysku yahay halka ugu horaysa ee shacabku ay ka dareemaan Dawladnimada.

Doodaydu wey kooban tahay waxay ku kooban tahay **Qodobka 34aad** ee xeerkan oo ah cabashada ka dhanka ah bilayska, Qodobkaasi marka aad u daadagto faqarada 2aad oo lagu aasaasay Guddiga heer Qaran ee cabashooyinka. Waxaa tirsigiisa farqada v ay ku qoran tahay, laba xubnood oo Qareeno madaxbanaan ah oo aqoon u leh shuruucda dalka, yaa soo magacaabaya halkaa wey ka maqan tahay.

**Waxaan soo jeedin lahaa in halkaa laga dhigo** oo ay soo magacaabeen, ama ay soo kala magacaabeen ururka Qareenada ee heer Qaran iyo ururka Qareenada Haweenka labadaa xubnood waxaan soo jeedin lahaa in ay ka kala yimaadaan labadaa institution.

Marka ay tagno **farqada 5aad** waxaa ku qoran Guddigu waxay ka samaysanaysaa Gobol kasta Guddi heer Gobol ah oo ka kooban, Guddidii baa samaysanaysa ayaa qoran, markaa hadana waxa uu farqada 1aad uu ku bilaabayaa, xubin shacab oo uu soo magacaabo Guddida Nabad galyada iyo Difaaca Gollaha Guurtida, waxaan u arkaa in ayna haboonayn kol hadii Guddidii heer qaran, Guurtidii iyo Golihii wakiillada Guddiyadoodii Difaaca iyo wasiirkii Arrimaha Guddaha iyo dadkii oo dhan ay soo magacaabeen, **in laga saaro Meesha faqradaha ka hooseeya oo dhan, oo lagu daayo Guddiga heer qaran waxay samaysanaysaa Guddiyo Gobol** hadii iyagii iyo Guddiyadii heer gobol ay soo wada magacaabaan, waxaan u arkaa in ay iska hor imanayso taasi.

Sidaa awgeed waxaan ku soo koobi **lahaa faqradaha, A, B, C, D, E, F** in laysku soo kobo oo halkaa lagaliyo faqrad 6aad oo ka hadlaysa twirade Guddida heer Gobol oo isla markaana loo daayo in Guddida heer qaran ay iyadu samaysanayso Guddiyada heer gobol, isla markaana maayarada ay shacabku soo doorteen ee degmooyinka laga soo doortay ay ka mid noqdaan Guddiyada heer Gobol.

Waxaan soo jeedin lahaa isla **Qodobka marka aynu ka hadlayno Madaxbanaanida** in Guddigan ay miisaaniyad gaar ah yeelato, faqradan ay soo jeediyay waxaan ku waafaqsanahay ama ku raacsanahay soo jeedintii xildhibaan Faysal in **Tirada 7xubnood** ah la koobo, oo laga dhigo **5 xubnood** halkaa faqrad layskaga wada dhigo.

Guddiga heer Qaran marka la leeyahay wasaarada Arrimaha gudaha ayay xafiis ku yeelanaysaa, waxaynu ka war qabnaa wasaarada Arrimaha Guddaha dadka shacabka ah ee cabanaya waxay u baahan yihiin xafiisyo la daadajiyo oo ilaa heer degmo, qof miskiin ah oo cabanaya in la yidhaahdo wasaarada arrimaha Guddaha oo sida lagu galaaba ay adag tahay, ha hortub maan dadku, oo iminka ID carad kii laga sii daadajinayo caqabad baan taa u arkaa, xaruntoodana waxaan odhan lahaa Dawlada hoose ee Hargaysa halagu daadajiyo iyaguna Guddida heer Gobolna xafiisyo ilaa degmooyinka maglaada Hargaysa iyo magaalooyinka kale ee dal kaba, hala daadajiyo oo yaynaan cabashadii keenin wasaarada **Arrimaha Guddaha ee Dawladaha hoosee halagu daadajiyo, inaga oo ka duulayna Qodobadii maamul daadajinta.**

Waxaan soo jeedin lahaa in ay Guddigaasi noqoto mid madax banaan, waa Guddi garsoor sida u muuqato waa Guddi administrative tirabaloolis samaynaya, oo Garnaq samaynaya oo cabasho ka garnaqaya, oo Anshax marin samaynaya, markaa Guddigasi waxaan samaynayaa in miisaaniyad ahaan loo madaxbaneeyo, oo ay noqoto sida uu dhigayo xeerka pfmku xarun kharasheed in lagu cadeeyo halkan.

Marka Guddi la magacaabo Gollaha wakiiladu xeer hoosaadkiisu waxa uu ka hadlay kulanka ugu horeeya ee ay iskugu imanayso, **markaa faqarad kale halagu soo daro oo** odhanaysa, **Guddiga Anshaxa ee heer Qaran ee la sameeyay waxaa kulankooda ugu horeeya** is kugu yeedhaya wasiirka wasaarada Arrimaha Guddaha.

**Md. Cabdikariin Aadan Cali** *{4min, 30sec}:-* Bismilaahi Raxmaani Raxiim Aad iyo aad ayaan ugu mahad celinayaa adiga iyo xildhibaanadaba, **Qodobka 11**[aad] ee pageka 11 in aan ku yara daro dhawr qodob oo kale, waxaa dhacda in Boolisku ay joojiyaan mararka qaar dad shicib ah, iyaga oo aan markaa usheegin sabab ay u joojiyeen waqti badana meel ku haya ama qaxeeya oo geeya saldhiga, markaa waxaan odhan lahaa halagu daro Askariga joojinaya qof shacab ah in uu u sheego sababta uu u joojiyay iyo Qodobka uu isticmaalay, hadii aanu markaa Askarigu u sheegin in qofka shacabka ahi uu iska socon karo Booliskuna aanu waxba ku samayn Karin.

Hadii uu u sheego waxa uu ku joojiyay qofka shacabka in ay waajib ku tahay inuu u hogaansamo, hadii Askarigu uu go`aansado in aanu dhaqaaqin arrina aanu u sheegin in ay noqonayso sharci darro, haday dhacdo Askarta Boolisku in ay qof xidhaan oo ay saldhiga Booliska ay geeyaan qofkaasi xor ayuu yahay waa in ay usheegaan sharciga ay adeegsadeen ee u ogolaanaya in ay saldhiga Booliska u qaxeeyaan, qofka shacabka ahi hadii Qodobkaa

loo sheego waa in uu hadii uu qoran karo uu qorto hadii Kalana uu xasuusnaado, hadhawna waxa uu noqonayaa sharciga u dhaxaynaya isaga iyo Booliska iyo sababta loo soo xidhay cadaynay, waayo markaa waxay noqonaysaa in aan la badali Karin wixii loo soo xidhay oo aan Eed cusub loo samayn Karin ilaa iyo Danbiyo kale lagu helo.

Qofka la xidhayaa haduu yahay qof ka yar 15 jir waa in waalidkii la ogaysiiyaa inta aan la xidhin ama aan interview laga qaadin, haduu yahay 18 jir uu lanool yahay waalidkii iyo 15 jir ka ahba waa in loo ogolaadaa **Qareen inta aan laga qaadin wax interview** ah hadii 18 jirku uu la nool yahay waalidii waa in la ogaysiiyaa sida 15 jirka oo kale.

Xeerka Booliska iyo Xeerka komishanka danbiyada Booliska **waxaan soo jeedinayaa** in **laba xeer laga kala dhigo**, komishanku uu noqdo hay`ad madaxbanaan oo Booliska la shaqaysa oo civilian ah oo la socota waxa wadanka ka dhaca iyo sida uu Boolisku u la macaamilayo shacabka, uuna noqdo komishan uu magacaabo sidii komishanada kale madaxwaynuhu oo komishan Qaran ah, Gobolada oo dhana ku leh qaybo.

Marka ay ka shaqeeyaan had iyo jeer in ay korjoogteeyaan masuuliyada iyo waajibaadka ciidanka iyo shuruucda oo Boolisku ku shaqeeyo sida loo dabaqayo, Boolisku inuu haysto dhaqaale ku filan in uu oversight gareeyo **Accountability-ga officers** iyo mdaxda Booliska si ay dadwaynaha ugu adeegaan si hufan iyo in ay sameeyaan Human Resource Management, shaqaalaha kale ee aan ahayn Booliska waxaa jira shaqaale shicib ah oo xaga **Administration-ka** kala shaqeeya Booliska si ay uwanaagsanaanto hab maamulka Booliska, iyo in ay ku xidhnaadaan Boolisku dadka shacabka ah community engagement Booliska la qaban qaabiyaan oo Bulshada iyo Boolisku isku xidhnaadaan marwalba si Nabad galayada guud loo sugo danbiyada wadanka ka dhacayana loo yareeyo.

Dadkuna ay bartaan shuruucda iyo sida uu ushaqeeyo Boolisku marwalbana aad iyo iskugu soo dhawaadaan shacabka iyo Boolisku sidoo Kalana Boolisku ay xaqiijiyaan Tayada Ninka askariga ah ee Booliska u shaqaynaya oo uu mar walba ahaado hab iyo nidaam iyo sharci la raacayo, oo shacabkuna iyaga oo ku miishanka raacaya in ay ku ilaaliyaan.

**Md. Abuubakar Siciid Cali** *{10min, 01sec}:-* Mudane Gudoomiye, Mudanayaal iyo Shaqaalaha waan salamaayaa ASC. Waxaan jecelahay dooddayda inaan xooga soo koobo hadii Eebe Idmo.

**Qodobka 3aad ee Ujeedada Xeerka Farqada 1aad** oo ah "In uu aasaaso qaab-dhismeedka, awooddaha iyo waajibaadka ciidanka Booliiska" waxaan ku dari lahaa xadidaada ama xuduuda awoodda ciidanka waxayna noqonasyaa **"In uu aasaaso qaab-dhismeedka, awoodaha, xuduudaha awoodooda iyo waajibaadkooda si looga hortago xad-gudub iyo dulmi".** Waxa kale oo aan isla qodobkaas ku dari lahaa **Farqad cusub** oo odhanayasa **"In si sharci ah loo qeexo doorka booliska ee ilaalinta amniga guud, xasiloonida, iyo ilaalinta nafta iyo hantida muwaadiniinta".**

**Qodobka 7aad oo ka hadlaya shakhsiyada qaanuuniga** ciidanka Booliiska Somaliland waxaan soo jeedinayaa oo ku darayaa **farqad cusub** oo odhanaysa "**Shakhsiyadda qaanuuniga ah ee boolisku waa mid ku xidhan. b- Inuu ku shaqeeyo shareecada Islaamka. t-Inuu u hogaansamo dastuurka iyo shuruucda dalka. J. Inuu ilaalinayo xuquuqda muwaadiniinta.**

**Qodobka 30aad ee waxyaabaha ka reeban Ciidanka Booliiska** waxaan soo jeedinayaa **farqad 8aad** oo odhanaysaa "**Si loo ilaaliyo xuquuqda muwaadinka, Booliska waxa ka reeban in ay awooddooda u isticmaalaan si sharci-darro ah, sida jirdil, handadaad, ama ciqaab ka baxsan sharciga"** waxa kale oo aan ku darayaa farqad 9aad oo cusub oo ah "**Qof lasoo dacweeyo ama lagu xidho saldhigyada boolisku waa inuu helaa xuquuqdiisa sharciha ah oo ay ugu horayso in maxkamad lagu horgeeyo hadii danbiga lagu eedaynayaa yahay mid cad ama sharci ahaan la aqbali karo. Hadii Kalana waa xoriyadiisa loo soo celiyaa"**

**Qodobka 34aad** waxa Golaha loo soo gudbiyay iyadoo ciwaanka qodobkaas ay ku qoran tahay "**Xafiiska dabagalka iyo cabashooyinka dadwaynaha"** Gudidduna waxay ku badeshay **"Cabashada ka dhanka ah ciidanka booliska"** marka waxa yar muuqata in labadaas cinwaan macnahoodu yar baahsan yahay, marka waxaan soo jeedin lahaa in qodobkaas cinwaankiisa laga dhigo "**Xafiiska cabashooyinka iyo dabagalka booliska"**

Isla markaa waxaan jeclahay inaan halkan ku xuso qodobkaas oo Gudiddu ka bilawday **farqadiisa 1aad cabashooyinka ka dhanka ah ciidanka booliiska waxa loo gudbinayaa gudi madax-banaan ee cabashooyinka,** markaa waxa fiican oo aan soo jeedinayaa in marka hore lagu xuso in xeerka lagu aassaasay gudidda cabashooyinka oo **farqada 1aad** laga dhigo **"Waxaa xeerkan lagu aasaasayaa Guddiga Cabashooyinka iyo Dabagalka Booliska, oo ah gudi madax-bannaan, awoodna u leh qaabilaadda cabashooyinka dadweynaha, baaritaanka xadgudubyada booliska, iyo soo jeedinta tallaabooyin sharci iyo kuwa anshax marineed"**

**Guud ahaan qodobkaas waxaan soo jeedinayaa in loo dhigo sidan;-**

1. Waxaa xeerkan lagu aasaasayaa Guddiga Cabashooyinka iyo Dabagalka Booliska, oo ah hay'ad madax-bannaan, awoodna u leh qaabilaadda cabashooyinka dadweynaha, baaritaanka xadgudubyada booliska, iyo soo jeedinta tallaabooyin sharci iyo kuwa anshax marineed.
2. Gudiga cabashooyinka iyo dabagalka booliska ee heer qaran waa inay ka koobnaataa 5 xubnood oo ku yimaada sidan:
   a- Xubin ay soo magacawdo gudiga Arimaha Nabadgalyada iyo Difaaca ee G/ wakiilada
   b- Xubin uu soo magacaabo wasiirka A/ guduhu

c- 2 xubnood oo qareeno madax banana oo aqoon buuxda u leh shuruucda dalka oo ay soo magacdo uruka qareenada J/Somaliland

d- Xubin gudiga xuquuqul iinsaanka ka timaada

3. Gobol kasta oo dalka ka mid ah waxa uu yeelanayaa wakiillo ka tirsan Gudiga Cabashooyinka iyo Dabagalka Booliska, si ay u fuliyaan hawlaha gudiga ee heer gobol.
4. Wakiillada gobolku waa inay noqdaan ugu badnaan shan (5) xubnood iyo ugu yaraan saddex (3) xubnood, iyadoo ku xidhan baaxadda iyo baahida gobolka.
5. Wakiilada gobolku waxa ay magacaabayaan Gudiga Dhexe ee Cabashooyinka iyo Dabagalka Booliska, iyagoo la tashanaya maamulka gobolkaas.

Waxa kale oo aan soo jeednayaa madaama gudidaas la samaynayo **inay yeeshaan shuruudo lagu soo xulo,** waxaana soo jeedinayaa **in lagu daro qodob shuruudaha xubinimada oo u dhigan.**

**Shuruudaha Xubnimada: -**

1- Waa inuu yahay shakhsi sumcad, caddaalad, khibrad maamul iyo anshax leh.
2- Ku habboon ilaalinta xuquuqda dadweynaha.
3- Da'doodu tahay mid u dhaxaysa 35 ilaa 65 sano.
4- Si loo ilaaliyo madax-bannaanida, Waa inuuna ka tirsanayn xubin ciidanka booliska ka mid ahi .

**Qodobka 35[aad] ee awoodaha gudidda cabashooyinka** waxaan isna ku darayaa oo ka maqan awoodaheeda oo aan soo jeedinayaa in lagu daro, **Gudiga dhexe wuxuu leeyahay awood guud iyo mid istiraatiiji ah, oo ay ka mid yihiin:**

1. **Dejinta siyaasadaha iyo habraacyada xafiiska**
   - Go,aaminta sida loo qaabilo cabashooyinka, loo diiwaangalinayo loona dabagalayo iyo waqtiga lagu jawaabayo.
2. **Kormeerka guud iyo qiimaynta wakiilada gobollada**
   - Korjoogtaynta iyo hubinta in wakiiladu ay si hufan u shaqeynayaan oo ay raacayaan xeerka.
   - Gudigu wuxuu soo gudbiyaa warbixino lix biloodle ah oo ku saabsan shaqada booliska iyo cabashooyinka la helay.

Waxa kale oo aan halkaas ku soo kordhinayaa qodob cusub oo ah waxyaabaha gudi cabashooyinka ka reeban qodobkaas oo ah "**Waxyaabaha Gudiga Cabashooyinka iyo Dabagalka Booliska aanay awoodda u lahayn:-**

1. Inay si toos ah u amraan hawlgallada booliska:- B) Gudigu ma faro gelin karo qorshe hawleed, howlgallo sirdoon ama amni oo ay boolisku wadaan.

2. Inay xukun sharci oo maxkamadeed bixiyaan:- B) Gudigu cabasho wuu dabagali karaa, dacwad oogi karaa, talo ayuu bixin karaa, balse go'aan kama dambays ah oo ciqaabi ka dhalanayso ma saari saari karto.

**Md. Cabdikariim Maxamuud Muxumed** *{02min, 04sec}:- Mudane Gudoomiye*, Qodob ayaan doonayaa inaan doodda kaga qayb-qaato ama sixitaan ku sameeyo, **Qodobka 34**aad ee cabashada ka dhanka ah ciidanka Booliiska **Farqadiisa 2**aad, Gudiddu waxay soo jeedisay in 7 xubnood ay ku yimaadaan gudidaas cabashada loo gudinayo, marka waxaan soo jeedinaya maadaama gudi badan tahay in lagu soo koobo 3 xubnood oo kala ah

- Xubin Gudidda Nagadgalyada Guurtidu soo magacawdo,
- Xubin Komoshianka Xuquuqal Insaanku soo magacawdo iyo
- Xubin khabiir dhinaca ciidanka Booliiska ah oo Taliyaha Ciidanka Booliisku soo magacaabo"

Marka 3 xubnood la soo magacaabo inay gudiddu marka iska dhex doorato qofka gudoominaya oo aan halkan lagu sii cadaynin ee uu noqdo mid iyagu gartaan.

**Farqada 5**aad **ee isla qodobkaas 34**aad ee ah in Gobol kasta gudi loo magacaabo, waxaan soo jeedinayaa in 3 xubood ee gudidda heer qaran iyagu gobolada u sii magacaabaan, masuuliyada iyo hawlaha ka socda goboladana ay gudiddaas 3 xubnood iyagu sii daadejiyaan.

**Qodobka shaqo-qorista** ka hadlaya waxaan doonayaa inaan isna laba farqadood ku daro, kuwaas oo kala ah:-

- In qofka ciidanka booliiska loo qaadanayo in baadhitaan marka hore lagu sameeyo inuu dambiyo soo galay oo criminal background-kiisa la baadho, sidoo kale caafimaadkiisa la baadho.
- In qofka ciidanka booliiska loo qaadanayo lagu sameeyo qiimayn akhlaaqdiisa, aqoontiisa iyo dhaqankiisaba.

**Md. Axmad Nuur Guruuje** *{03min, 32ec}:-* Mudane Gudoomiye, waxaan doonayaa wax ka badelka xeerkaas booliiska in aan qodob soo jeedin ah ku darno. Mudanayaal, sidaynu la wada socono ciidanka booliiska awoodihiisu waa ilaalinta nafta, hanti, maalka iyo sharafta qofka bini'aadamka ah ee waddankeena ku noool, hadii yihiin muwaadiniinta iyo haday yihiin dadka kale ee sida sharciga ah wadanka u jooga.

Sidaa darteed, waxa jira laba dhibaato oo waawayn oo iminka waddankeena ka jira, labaas dhibaato oo wax ka qabadkooda booliisku ka masuul yahay, hadana hay'addaha u xilsaarani u baahan yihiin in awood dheeraad ah xeerka loogu cadeeyo.

**Dhibaatada kowaad waa shilalka gaadiidka.** Xalay oo qudha waxa la sheegay in shilalka baabuurta magaaladeenan oo kaliya 21 shil baabuur ay ka dhaceen, Shilalka gaadhi ee waddankeena ka dhaca waxaaba la odhan karaa waa xasuuq, wadama dagaalada joogtada ahi ka socdaan ee dilalku si joogto ah uga dhacaan waxa la odhan karaa waxa ka geeri iyo dhibaato badan shilalka gawaadhida ee waddankeena ka jira.

Sidaa darteed, inagoo og Tayada iyo awoodi darida ciidanka nabadgalyada waddooyinka oo ciidanka booliiska ka mid ahi waxaaan soo jeedinayaa in awoodo iyo faah-faahin dheeraada xeerkan loogu daro ciidanka nabadgalyada waddooyinka, ciidankaas oo sharci ahaan ka mid ah ciidanka booliiska oo ciidan madax-banaan maaha, markaa xeerkan booliisku waa inuu sheegaa awood dheeraad ah oo uu leeyahay ciidanka nabadgalyada waddooyinku, tusaale ahaan Taliyaha Ciidanka Nabadgalyada waddooyinka waxaan soo jeedin lahaa in Madaxweynuhu magacaabo sida talye qaybeedyada militariga uu Madaxweynuhu u magacaabo iyagoo militariga ka tirsan.

Waxa kale oo aan soo jeedinayaa in Ciidanka Nabadgalyada Wadooyinka Miisaaniyad dheeraad ah, tababaro iyo Technology-yad lagu kaabo, isla markaana la kordhiyo wada-shaqaynta ka dhaxaysa Ciidankaas iyo Maayarada Degmooyinka oo xeerka lagu sheego.

**Mukhaadaraadka**. Dhibaatada kale ee waddankeena dhalinyarada dhibta wayn ku hayaa waa mukhaadaraadka oo ah aafo khatar ku ah dhalinyarada, marka iyadana waxaan soo jeedinayaa in la xoojiyo oo si gaar ah loo calaamadiyo laanta ka hortaga mukhaadaraadka ee ciidanka booliiska, Iyana waxay u baahan yihiin in qodobo si gaar ah u taabanaya lagu daro Xeerka, waadna mahadsan tihiin.

| | |
|---|---|
| **Cawad Cali Maxamed** | **C/risaaq Siciid Ayaanle** |
| **Agaasimaha W. Shuruucda & H/qoraalka G/Wakiilada** | **Xoghayaha Guud ee Golaha Wakiilada** |
| ------------------------------------------------- | -------------------------------------- |